

Markii aad shirkad raashinka ka **ganacsato hirgelnayso**



Markii aad shirkad raashinka ka ganacsato hirgelnayso

Haddii aad ku talo jirto inaad furato ganacsiga raashinka, sida makhaayad, dukaan raashin lagu iibiyo ama pizzeria, waa inaad kahor wargelisaa Maamulka arrimaha deegaanka iyo ilaalinta caafimaadka [miljö- och hälsoskyddsförvaltningen].

DWaxaad dhaqdhaqaaqa bilaabi kartaa markii 14 maalmood ka soo wareegato maalinta wargelintaada na soo gaarto. Markii aad ganacsiga bilaawdo waxaan ku dhaqaaqi doonaa booqashadii ugu horeeysay.

Waa inaad bixisaa kharashka guddoonsiinta wargelinta iyo diiwangelinta shirkaddaada. Tan kale, waa inaad bixisaa kharash-sannadeed taasoo u sabab ah kormeerida dhaqdhaqaaqa ganacsigaaga, kaasoo anaga fulin doono.

Xeerka arrimaha raashinka ka sokkoow, waxaa jiraan dhowr xeerar iyo hey'ado kale oo adiga ku shuruudayn doono maadama aad ku talo jirto inaad shirkad sameeysato. Hey'adda Canshuuraha [Skatteverket] iyo Hey'adda ganacsiga waxay wadajir u leeyihiin adeeg, kaasoo shirkaddaada ka diiwan gelin karto.

Teeda kale, waxaad u baahan tahay ruqsad haddii tusaale ahaan aad ku talo jirto:

- inaad iibiso khamriga, nooc kasta ha ahaade
- jid- iyo dibad wax ku iibin
- badeecadaha dabkaca sababa, qaboojiyeyaal
- ruqsadda dhismaha, dhismaha tubooyinka biyaha iyo wasakhda
- dufan ka socida, kontroolka mariinada hawada, qiiqa
- qashin-qubka, kala socida qashinka, qashinka halista ah
- dib u warshadaynta baakooyinka





Xeerarka khuseeya dhammaan shirkadaha ka ganacsada raashinka

Mas'uuliyadda

Ka ganacsade ahaan waxaad mas'uul ka tahay raashinka aad soo saarto, rarto, baqaar geliso ama iibiso. Waa qodobo ku saabsan tusaale tixgelinta nidaamyada ammaanka iyo calamadaynta. Waxaad mas'uul ka tahay in goobaha ganacsigaaga ay ku habboon yihiin dhaqdhaqaaqaaga.

Kormeer dhaqdhaqaaqaaga

Kormeeridaada waa hab-dhis adiga ku gaar ah, kaasoo ku sugayso in dhaqdhaqaaqa u tixgelinaayo shuruudaha sharciga, iyo in raashinkaaga walwal la'aan macaamiishaada cuni karaan. Waa inaad leedahay habsamaan joogto ah oo ku saabsan waxa la sameynaayo iyo sida loo sameeyo.

Aqoonta muhim ah

Maadaama aad raashin ka ganacsato, waxaa aad muhim u ah inaad aqoon fiican u leedahay noocyada cudur-keeneyaasha, siyaabaha cudurrada u faafaan, nadaafad-shaqsiyeedka iyo allergener, oo ah maadooyinka aleerjiyada sababa. Sababta xannuunka xiriirka la leh raashinka ugu wayn, waxaa weeyaan aqoon-darrada hufnaanta raashinka. Adiga oo raashinka ka ganacsada ayaa mas'uul ka ah oo aad hubsato in adiga iyo shaqaalahaga aad aqoonta saxa ah leedihiin. Tababar gaar ah oo lagugu xujaynaayo ma jiro.

Keydinta

Ka feker inaad haysato goobo kugu filan aad ku keydsato raashinka iyo qalabyada aad isticmaasho. Qalabyada nadaafadda waxay u baahan yihiin in lagu keydsho meel gooni ah, oo wasakhdooda qalabyada kale laga fogeeya. Dabcan qashinka waa in u leeyahay goob iyo weel u gaar ah.

Waxyaalaha lagu cunteeyo iyo nadiifintooda

Waxyaalaha lagu cunteeyo oo wasakhda ah waa in laga fogeeya qalabyada nadiifka ah.

Cayayaanka waa in goobaha ganacsiga laga fogeeyaa

Goobaha ganacsiga waa in loo habeeyaa hab cayayaanka laga fogeeyo. Siyaabaha kale ee cayayaanka goobaha looga fogeeyo waxaa weeyaan, iyadoo si fiican goobta loo nadiifiyo, habsanaanta lagu dadaalo, qashinkuna si fiican wax looga qabto.

Heer kulul-qaboowga

In raashinka lagu keydsho heer kulul-qaboow oo sax ah waa mas'uuliyad adiga ku saaran. Raashinka karsan oo lagu talo jiro in qaboojiyaha culus lagu keydso, waa in marka hore si dhaqsi ah la qaboojiyaa.

Ka warbixinta raashinka iyo calamadaynta

Nidaamka guud waxaa weeyaan in dhammaan raashinka baakadaha ku jiro la calaamadeeyo. Teeda kale, waa inaad ka warbixin karto waxa laga sameeyay raashinka aan baakada ku jirin oo aad iibiso. Tani waxay siiba muhim tahay haddii raashinka laga sameeyay maadooyin aaleerjiyada keena [allergener]



-
- Warbixin dheeraad waxaad ka aqrisan karta shabakadda internetka ee hey'adda www.livsmedelsverket.se
 - Wixii su'aallo ah waxaad kala xiriiri kartaa rugta macaamiisha, taleefantelefon 021-39 00 00.
-



VÄSTERÅS STAD

Miljö- och hälsoskyddsförvaltningen
www.vasteras.se